# QAYBTA KOWAAD

## SHARCI

SHARCI Lambar 1 Tr. 15 Dis. 1987, Salaanta Qaranka.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

IsAGOO TIXGELIYEY: Oggolaanshaha Guddiga Joog-tada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Heesta taariikhiga ah ee hordhiceedu yahay «SOOMAA-LIYEY TOOS, TOOS OO ISKU TIIRSADA, HADBA KIINA TAAGDARAN TAAGEERA ABIDKIINEY», Waxaa loo qaatay inay noqoto «Salaanta Qaranka» ee J.D.Soomaaliya.

Qodobka 2aad

Miraha Heesta iyo muusikadeeda waxay ku cad yihiin Lifaaqyada «A» iyo «B» ee Sharcigan.

Qodobka 3aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa laga bilaabo 16ka No-fembar 1988, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 15 Dec. 1987

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

SALAANTA QARANKA

LIFAAQA «A»

SOOMAALIYEEY TOOS,
TOOS OO ISKU TIIRSADA,
HADBA KIINA TAAG DARAN,
TAAGEERA ABIDKIINEEY,
IDINKAYSU TAAKHAAYOO,
IDINKAYSU TAAMMAAYEE,
AADANUHU TACLIIN BARAYOO,
WADDANKIISA TAAM YEEL,
ARLIGIINNAA TAAKA AHOO,
SHARCIGAA ISKU KIIN TOLAYOO,
LUQADDAA KU WAAXIDAHOO,
KUMA KALA TEGAYSAAN,
TIRO ADHIYOO DHAXALAA,
SIDDEED LAYDIIN SOO TUBAYOO,
NINBA TOBAN LA MEELMARAYOO,
CADOWGIIN IDIIN TALI,
TULDO GEELOO DHACAN BAAD,
TOGASHO UGU BADHEEDHAANE,
MA DHULKAA DHANEE TEGEY BAAN,
NINNA DHAGAX U TUURAYN,
QARANKAN HUBKIIU TUMAYO,
TOORRAYDA DHAAFAYN,
OON TAAR SAMAYN KARIN,
UURKU TAALLA WEYNAAYEEY,
HADBA WAXAAN LA TAAHAAYOO,
TOGAGGA UGA QAYSHAA,
NIN DALKIISII CADOW TAABOO,
U TOL WAAYEY BAAN AHAYEEY,
HADBA WAXAAN LA OOYAA,
ILMADU IIGU QUBATAA,
IKHTIYAAR NIN LOO DIIDOO,
LA ADDOONSADAAN AHAYEEY.